



# Bartaha Afka Ingiriiska: Xaquuqdaada ah Helida Taliin Sinaan ah

English Language Learners: Your Right to Equal Education

## Waa maxay macnaheedu inaad tahay arday ah ELL/ESL?

Bartayaasha afka Ingiriisku (ELL), ee sidoo kale loogu yeero Ingiriis Af Labaad ah (ESL), waxa ay xaq u leeyihiin inay ku helaan fursado u sinaan taliinta iskuulka ah. Taa macnaheedu waa waxaa jira nidaamyo ah sida uu iskuulku uu uga caawiyo ardayda inay ku najaxaan taliintooda.

## Sidee ayey tahay in iskuuladu u caawiyaan ardayda aan aqoon Afka Ingiriiska?

Iskuulku waa inuu:

- Cadeeyaa ardayda u baahan fasalada Afka Ingiriisiga ah.
- Lahaado barnaamij ELL ah oo la xaqiijiyey inuu shaqaynayo uuna ka caawiyo ardayda inay najaxaan.
- Qoro tababarana shaqaale si ay ula shaqeeyaan Ardayda EEL ka.
- Uu qiimeeyo barnaamijka uuna isbedelo ku sameeyo hadii ardaydu aysan ka soo baxayn hadafyada loo dajiyey.
- Ka caawiyo ardaydu inay bartaan Ingiriiska **iy**o inay ka soo baxaan heerarka waxbarasho ee dhamaan ardayda gobolka oo dhan la rabo inay ka soo baxaan.



## Waa maxay waajibka iskuulka ka saaran waalidka?

Iskuulku waa inuu:

- Helaa qaab uu ugula kula hadli karo waalidka afkooda uuna helaa jidad ay iyagu qayb uga noqon karaan taliinta ilmahooda.
- Ugu sheego 10-cisho gudahood kolka ilmahooda loo aqoonsato arday EEL ah.
- U tilmaamaa waalidka adeegyada la fidiyo waxa ay yihiin iyo hadafyada uu ardaygu u baahan yahay inuu ka soo baxo si uu u dhamaystiro barnaamijka. Iskuulku waa inuu waalidka ogaysiiyaa inay xaq u leeyihiin inay diidi karaan adeegyadaa.
- Ogaysii waalidka hadii barnaamijka ardayda EEL uusan ka soo bixin hadafyada sanadkii.

## Iskuuladu MA AY

- Ka sooci karaan ardayda ELL ka ardayda kale qayb weyn oo waqtiga maalintii iskuulka ah.
- U diidi karaan ardayda ELL ka barnaamijyada qaniyeynta ah ama koorsooyinka jaamacad u diyaargarowga ah.
- Ugu sooci karaan si joogta ah ardayda ELL ka qaybaha hoose ee farsamada gacanta lagu barto.



*Waxaa la sameeyey iyadoo la kaashanayo Barnaamijka Adeegyada Wacyigelinta Sharciyada ee Nawaaxiga Koofurta Minnesota (Southern Minnesota Regional Legal Services Education Law Project).*

**Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.** Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.